



Adeeg ma ka codsan karaa VRS?

Can I Get Services from VRS?

Waa maxay VRS?

Sharciga dawladda dhexe ee Sharciga Shaqo dib ugu celinta waxa uu dhigayaa in lacagta loo adeegsado shaqo dib ugu tababaridda dadka naafada ah. Adeeggan noocan ah waxa uu kaa caawinayaa in aad shaqo hesho oo aad ku nagaato. Minnesota, Adeegga Shaqo Ku Tababaridda (VRS) waxaa loogu talo galay dadka jirka ama maskaxda naafada ka ah oo doonaya in ay shaqeeyaan.

Ma codsan karaa adeegga?

Guud ahaan, waxa aad ka soo baxday shuruudaha adeegga VRS haddii:

1. Aad tahay qofka jirka ama maskaxda naafo ka ah oo ay ku adag tahay inuu shaqo helo ama shaqada ku nagaado.

oo

2. Aad u baahan tahay adeegga shaqo ku tababaridda si aad ugu diyaar garoowdo, u hesho uguna nagaato shaqada.

VRS waxa ay eegtaa intee ayaa naafanimadaadu sabab u tahay shaqo aad hesho ama shaqada ku nagaato. Waxa ay isticmaalaan warbixinta dhakhtarkaaga iyo xirfadlayaasha kale si ay go'aan uga gaaraan.

Dadka ka soo baxa shuruudaha kabitaanka Dakhliga ee Lambarka Bulshada ama ceymiska naafada ee Lambarka Bulshada iyada oo lagu saleynayo naafanimada ay qabaan oo wali aan gaarin xilligii hawlgabka way ka qeyb qaadan karaan, haddii aanay aheyn dad aad naafo ah oo aan ka faa'iideysan karin adeeggan.

Haddii ay VRS go'aan ku gaaraan in aadan ka faa'iideysan karin adeegga naafanimadaada oo aad u daran darteed, waa in ay soo bandhigaan "cadeymo lagu qanco oo lagu kalsoonaan karo"

Qof kasta oo ka soo baxa shuruudaha miyaa la caawiyaa?

Nasiib daro, VRS ma laha miisaniyad ku filan oo ay ku caawiso dhamaan dadka ka soo baxa shuruudaha. Waxa ay go'aan la gaaraan cidda ay caawinayaan iyaga oo adeegsada "habka kala



doorashada.” Taasi waxa ay ka dhigan tahay in dadka qaarkood adeegga ka hor helaan dadka kale. Waxa ay ku xiran tahay inta ay le’eg tahay naafanimadooda.

Habka kala doorashada dadka naafanimadoodu aad u daran tahay ayaa laga hor mariyaa dadka ay naafanimadoodu fududahay.

Dadka naafanimadoodu fududahay ama yar tahay waxaa laga yaabaa in aan wax adeeg ah loo fidin haddii aan la helin misaaniyad ku filan barnaamijyada VRS si ay qof kasta ugu adeegaan.

Waa maxay naafanimo aad u daran?

Waxa aad leedahay **naafanimo aad u daran** haddii:

1. Haddii ay naafanimadaadu adkeysato mid ama laba ka mid kuwa soo socda:

- in aad meel ka tagto oo aad tagto meel kale
- in aad la hadasho ama aad dhageysato dadka kale
- naftaada aad daryeesho
- in aad sameyso ama fuliso qorshe
- in aad u adkeysato shaqada (waxa aad u baahan isbedel lagu sameeyo si aad u qabato shaqada)
- aad leedahay xirfadda looga baahan yahay shaqada
- si fiican ula shaqeyso dadka kula shaqeynaya



oo

2. aad u baahan tahay wax ka badan hal adeeg oo lagu qabto muddo dheer si aad ugu diyaar garowdo, ku hesho oo aad ugu nagaato shaqada.

Habka Kala Doorashada

Habka kala doorashada ee VRS waa mid ku dhisan 4 darajo. Dadka ku jira darajada koowaad ayaa marka ugu horeysa loo fidiyaa adeegga.

– **Muhimadiinta koowaad:**

Tani waa dadka ay naafanimadoodu aad u daran tahay. Waxa aad ka tirsan tahay kooxdan haddii aad leedahay 3 xadidaad ee kor lagu soo sheegay.

– **Muhimadiinta labaad:**

Waxa aad ka tirsan tahay kooxdan haddii aad leedahay 2 ka mid ah xadidaadda kor lagu soo sheegay.

– **Muhimadiinta sadexaad:**

Waxa aad ka tirsan tahay kooxdan haddii aad leedahay 1 ka mid ah xadidaadda kor lagu soo sheegay.

– **Muhimadsiinta afraad:**

Waxa aad kooxdan ka tirsan haddii aad ka soo baxday shuruudaha laakiin aysan naafanimadaadu sidaas khatar u sii aheyn.

Dadka ay naafanimadoodu aad u yar tahay waxaa inta badan lagu daraa liiska sugayaasha. Macluumaadkii ugu dambeeyay ee liiska sugayaasha la xiriir xafiiska degaankaaga ee VRS.

Sidee ayaan ku codsadaa?

1. Waa in aad telefoonka kula xiriirtaa ama aad booqataa xafiiska VRS. Haddii aadan garaneyn halka uu ku yaalo xafiiska kuugu dhow, la xiriir xarunta VRS ee St. Paul. Iyaga ayaa kuu sheegaya xafiiska aad la xiriireyso.

Xarunta VRS Office ee St. Paul:

- Telefoonka Magaalooyinka Ku Hareereysan 651-259-7366
- Telefoonka lacag la'aanta ah cod : 1 (800) 328-9095

Waxa kale oo aad soo booqan kartaa: <https://mn.gov/deed/job-seekers/disabilities/find-vrs/>

2. Waxa ay ku siinayaan codsiga aad buuxineyso oo aad ogolaaneyso in macluumaadkaaga loo soo diro. Macluumaadkaaga oo loo soo diro waxa ay VRS fursad u siineysaa in ay helaan macluumaadkaaga caafimaad ee dhakhtarkaaga iyo barnaamijyada aad horay uga soo qeyb qaadatay.



3. Waxa ay u badan in aad ka qeyb qaadato barnaamij wacyi gelin ah.

Shaqaalaha VRS ayaa soo ururiya macluumaadka intiisa badan iyo goobihii hore ee aad ka soo shaqeysay, waxbarashada iyo tababarada, hiwaayadda iyo waxyaabaha aad jeceshahay, baahida shaqo u diyaarinta iyo waxa aad hiigsaneyso.

VRS waxa ay eegaan macluumaadka ay hayaan oo go'aan ku gaaraan. Haddii aanay ku fileyn in ay go'aan gaaraan, VRS waxa aad kala shaqeyneysaan helitaanka macluumaad dheeraad ah. Haddii ay lacag kaaga baxeeyso helitaanka macluumaadka, VRS ayaa bixineysa.

Go'aanada intooda badan waxaa lagu garaa 60 maalmood gudahood laga soo bilaabo taariikhda codsigaaga.

Haddii Lagu Diido Adeegga

Haddii ay VRS diido codsigaaga, waa in ay kuu soo diraan waraaq ay kugu wargelinayaan:

1. Sababta ay codsigaaga ku diideen.
2. xuquuqda aad leedahay iyo waxyaabaha aad qaban karto haddii ay jirto dhibaato oo
3. ku saabsan Mashruuca Taageerada Macaamiisha (CAP) iyo sida CAP ay kuu caawin karto.
 - Haddii laguugu diiday naafanimadaada oo aad u daran darteed

ama

- Haddii la diiday codsigaaga laakiin uu hadafkaagu ahaa in aad hesho shaqo xarunta shaqaaleynta (sida dukaan leh goob shaqo ama DT&H) oo aysan shaqo aad loogu tartamo oo mushaharka ay bixisaa ugu yaraan yahay kan ugu yar ee lagu shaqeyo.

VSR waa in ay ku siisaa fursad si buuxda lagaala tashto **ka hor** inta aanay go'aan ku gaarin in ay diidaan codsigaaga. Xaaladdan oo kale 2 shay oo aasaas ah ayaad xaq u leedahay.

1. VRS waxa ay eegaan codsiga qof kasta oo soo codsada si ay u eegaan haddii aad ka soo baxday shuruudaha mar kale.
2. Waxa aad markiiba ka qaadan kartaa racfaan go'aanka diidmada. Akhri warqadda xogta urursan [Racfaanada VRS](#).



Mashruuca Gargaarka Macaamiisha (CAP)

Haddii aad tahay macmiil ama codsade VSR ama SSB, waxa aad la xiriiri kartaa Mashruuca Gargaarka Macaamiisha (CAP) si ay kuu caawiyaan haddii aad wax su'aal ah, dareen ama cabasho ka qabto adeegga dib shaqo ugu diyaarinta. CAP **ma bixiso** waxyaabo dadka si toos ah uga caawiya shaqada sida waxbarasho, tababar ama qalab.

Akhri xogta urursan ee [Mashruuca Gargaarka Macmilka](#).

Macluamad dheeraad ah oo CAP ku saabsan ama sida loo codsado adeegga CAP, la xiriir:

- (612) 334-5970 (Agagaarka Magaalooyinka Mataanaha ah)
- 1- 800- 292-4150 (gobolka oo dhan)

Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen. Ha isticmaalan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.

© 2023 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.